**WASAARADDA QORSHEYNTA, MAALGASHIGA IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA**

WASAARADDA QORSHEYNTA QARANKA

# WARSIDAHA BISHA ABRIIL 2026



## HORDHAC

**Bishii Abriil 2026,** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay sii xoojisay doorkeeda hoggaamineed ee hagidda ajendaha horumarineed ee dalka, iyada oo diiradda saartay isku-duwidda qorsheynta, dardargelinta maalgashiga, iyo hirgelinta nidaamyo wax-ku-ool ah oo kormeer iyo qiimeyn ku saleysan natiijooyin.

Inta lagu guda jiray muddadan, Wasaaraddu waxay qabatay kulamo istiraatiiji ah oo heer qaran iyo heer caalami ah, kuwaas oo lagu xoojinayo iskaashiga bah-wadaagta horumarineed, la jaanqaadidda mashaariicda iyo siyaasadaha Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), iyo kor u qaadidda hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo waxqabadka hay'adaha dowladda.

Sidoo kale, dadaallada Wasaaradda waxay si gaar ah u muujiyeen muhiimadda ay leedahay in la mideeyo qorsheynta qaranka, la dardargeliyo soo jiidashada maalgashiga gudaha iyo dibadda, lana dhiso hay'ado dowladeed oo awood leh, isku xiran, isla markaana ku shaqeeya hannaan ku saleysan natiijooyin la cabbiri karo.

Warbixintan waxa ay soo bandhigaysaa dhacdooyinka, kulamada, iyo horumarrada muhiimka ah ee dhacay muddadii u dhaxaysay 1-da ilaa 30-ka Abriil 2026, kuwaas oo ka tarjumaya jihada istiraatiijiga ah ee Wasaaradda iyo dadaallada joogtada ah ee lagu xaqiijinayo horumar dhaqaale oo waara oo ay ka faa'iideystaan dhammaan shacabka Soomaaliyeed.

## Xoojinta Iskaashiga Deeq-bixiyayaasha iyo Hagaajinta Maareynta Deeqaha Horumarineed



**30-ka Abriil 2026 -** Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa kulan muhiim ah la yeeshay Madaxda Iskaashiga ee Dowladaha Jarmalka iyo Boqortooyada Ingiriiska, Mudane Simon Hagemann iyo Mudane Chris Pycroft, oo ah guddoomiyayaasha Madasha Deeq-bixiyayaasha Soomaaliya (Somali Donor Group).

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta wadashaqeynta hannaanka isku-duwidda deeqaha caalamiga ah. Masuuliyiinta ayaa dib u milicsaday guulaha iyo caqabadaha jira, iyagoo isla meel dhigay wadiiqooyin wax ku ool ah oo kor loogu qaadayo maareynta deeqaha. Sidoo kale, waxaa xoogga lagu saaray sidii loo dardargelin lahaa hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP), iyadoo la tixgelinayo isbeddellada ku yimid deeqaha horumarineed ee heer caalami (Official Development Assistance).

## Xoojinta Iskaashiga UN Women ee Horumar Loo Dhan Yahay



**29-ka Abriil 2026 -** Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa kulan la yeeshay Marwo Anna Mutavati, Agaasimaha Gobolka Bariga iyo Koonfurta Afrika ee UN Women.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga Dowladda Soomaaliya iyo UN Women si loo taageero horumar loo dhan yahay oo waara, iyadoo la waafajinayo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2026–2030).

Inta uu socday kulanka, labada dhinac waxay ka wada hadleen arrimo ay ka mid yihiin ka-qaybgalka bulshada ee qorsheynta, ballaarinta fursadaha dhaqaale, taageeridda nabadda iyo xasilloonida, xoojinta nidaamyada xogta, iyo dhisidda awoodda hay'adaha dowladda.

Labada dhinac ayaa ugu dambeyn isla qaatay in la sii xoojiyo iskaashiga iyo isku-duwidda si loo gaaro natiijooyin wax ku ool ah oo faa'iido u leh bulshada Soomaaliyeed.

## Dardargelinta Falanqaynta Dhaqaalaha iyo Tayeynta Warbixinnada Istiraatiijiga ah



**26-ka Abriil 2026 -** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha XFS, Mudane Cabdifataax Cabdiqaadir Faarax (Abdifatah Hared), ayaa kulan istiraatiiji ah la yeeshay Waaxda Horumarinta Dhaqaalaha.

Agaasimaha Waaxda, Dr. Cabdinaasir Cumar Kaatib, ayaa soo bandhigay waxqabadkii 2025, qorshe-hawleedka 2026, heerka diyaarinta Warbixinta Odoroska Dhaqaalaha, iyo mudnaanta howlaha ee rubuca labaad (Q2) ee sanadkan.

Agaasimaha Guud ayaa faray waaxda in ay: dardargeliso falanqaynta iyo soo saarista xogta dhaqaalaha, xoojiso tayada iyo waqtiga warbixinada istiraatiijiga ah, isla markaana hubiso in dhammaan howlaha ay si toos ah u waafaqsanyihiin hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP2025_2029).

Kulankan ayaa qayb ka ah dadaallada Agaasimaha Guud uu ku xoojinayo waxqabadka gudaha Wasaaradda, isla markaana lagu hubinayo in waaxyaha muhiimka ahi si wax-ku-ool ah uga qayb qaataan kobcinta dhaqaalaha dalka.

## Horumarinta Maalgashiga Duulista iyo Kaabeyaasha Hawada



**26-ka Abriil 2026 -** Agaasimaha iyo Howl-wadeennada Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, ayaa kulan heer sare ah la yeeshay hoggaanka Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed si loo xoojiyo iskaashiga istaraatiijiyadeed loona furo fursado maalgashi oo ka jira majaalka duulista iyo kaabeyaasha la xiriira.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray sidii loo xoojin lahaa soo-jiidashada maalgashi tooska ah ee dibadda iyo gudaha, dib-u-eegista mashaariicda qaran ee maalgashiga duulista hawada, iyo tayeynta guud ahaan adeegyada ay hay'addu siiso maalgashatada.

Kulanku waxa uu sidoo kale muujiyey muhiimadda ay leedahay horumarinta bixinta adeegyada iyo xoojinta hannaanada daryeelka maalgashatada kadib aas-aaska shirkadahooda, si loo xaqiijiyo hufnaan, saadaalin, iyo tartanka suuqa furan.

Kulankan waxa uu ka tarjumayaa himilo wadajir ah oo lagu doonayo in Soomaaliya laga dhigo saldhig duulimaad, taas oo ku dhisan qaabeynta jawiga maalgashiga iyo kalsoonida maalgashatada oo sii kordhaysa, iyo aragti fog oo ku wajahan koboc dhaqaale waara.

## Dardargelinta Fulinta Qorshayaasha Qaranka iyo Xoojinta Waxqabadka Gudaha



**25-ka Abriil 2026 -** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdifataax Cabdiqaadir Faarax (Abdifatah Hared), ayaa kulammo istiraatiiji ah la yeeshay Agaasimeyaasha Waaxaha Qorsheynta iyo Isku-duwidda Deeqaha, kuwaas oo diiradda lagu saaray dardargelinta fulinta qorshayaasha wasaaradda iyo xoojinta jihada istiraatiijiga ah.

Kulammada ayaa lagu falanqeeyay heerka uu marayo qorshe-hawleedka sanadlaha ah, waxqabadka la gaarey, iyo caqabadaha jira ee u baahan xal degdeg ah. Agaasimeyaasha labada waax—Mudane Maxamed Wali iyo Mudane Cabdifataax Cismaan Xasan—ayaa soo bandhigay warbixinno ku saabsan howlaha socda iyo sida ay ula jaanqaadayaan mudnaanta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Intii uu kulanku socday, Agaasimaha Guud ayaa carrabka ku adkeeyay muhiimadda ay leedahay in la xoojiyo hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo diiradda saarista natiijooyinka, isagoo xusay in dadaallada wasaaradda ay si toos ah ugu xiran yihiin hirgelinta ballanqaadka waxqabad ee dowladda.

"Waxaa nalaga sugayaa natiijooyin muuqda. Waa in aan laba-laabnaa dadaalkeenna si aan u xaqiijinno hirgelinta qorshayaasha qaranka," ayuu yiri Agaasimaha Guud.

Kulammada ayaa kusoo dhammaaday is-afgarad ku saabsan xoojinta wada-shaqeynta iyo dardargelinta howlaha mudnaanta leh, si loo hubiyo in qorshayaasha la dejiyo ay u beddelmaan waxqabad la taaban karo oo saameyn togan ku leh horumarinta dalka.



## Xoojinta Waxqabadka Waaxyaha iyo Isku-xirka Mudnaanta Qaranka



**22-ka Abriil 2026 -** Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdifataax Cabdiqaadir Faarax, ayaa si rasmi ah u bilaabay kulamo isdaba-joog ah oo uu la yeelanayo waaxyaha kala duwan ee Wasaaradda, si loo dardargeliyo howlaha iyo hirgelinta mudnaanta qaranka.

Kulankii ugu horreeyay ayaa Agaasimaha Guud waxa uu la yeeshay madaxda iyo shaqaalaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta iyo Waaxda Maalgashiga, halkaas oo diiradda lagu saaray isbarasho shaqo iyo qiimeyn ku saabsan habsami u socodka howlaha iyo qorshayaasha jira.

Agaasimayaasha labada waaxood, Mudane Maxamuud Siciid Nuur iyo Mudane Maxamed Dubo Maxamed, ayaa soo bandhigay warbixinno la xiriira waxqabadkii u dambeeyay, caqabadaha jira, iyo howlaha mudnaanta u leh Wasaaradda, iyagoo sidoo kale iftiimiyay baahida loo qabo dardargelinta fulinta qorshe-howleedka sannadlaha ah.

Agaasimaha Guud ayaa bogaadiyay shaqada ay qabteen waaxyaha, isagoo xusay in hoggaankiisu diiradda saari doono xoojinta waxqabadka, kor u qaadista wada-shaqeynta gudaha, iyo hubinta in dhammaan howlaha Wasaaraddu si toos ah ugu xirmaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), si loo gaaro natiijooyin muuqda oo saameyn ku leh horumarinta dhaqaalaha iyo nolosha shacabka.



Kulamadan ayaa qeyb ka ah dadaallada lagu xoojinayo hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo waxqabad ku saleysan natiijooyin (results-based performance), kuwaas oo laf-dhabar u ah hirgelinta ajendaha horumarineed ee dalka.

## Horumarinta Maalgashiga ICT-ga iyo Iskaashiga Hay'adaha Isgaarsiinta




**22-ka Abriil 2026 -** Agaasimaha Waaxda Maalgashiga (SOMINVEST) ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Mohamed Dubo, ayaa kulan la yeeshay Agaasimaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Mudane Mustafa Yaasin Sheikh.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta wada-shaqeynta u dhaxeysa SOMINVEST iyo HIQ, horumarinta maalgashiga kaabeyaasha tiknoolojiyadda, iyo kobcinta jawi ganacsi oo fududeynaya maalgashiga ICT-ga dalka, si waafaqsan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (2025–2029) iyo shuruucda dalka.

Labada dhinac ayaa isla qaatay muhiimadda isku-dubbaridka siyaasadaha, horumarinta kaabeyaasha casriga ah, iyo taageeridda maalgashadayaasha ku howlan tiknoolojiyadda.

Kulanka waxaa sidoo kale lagu soo bandhigay mashaariicda qaran ee mudnaanta leh ee la xiriira horumarinta tiknoolojiyadda dalka.

## Xoojinta Iskaashiga Kormeerka iyo Qiimeynta Bah-wadaagta Horumarineed



**21-ka Abriil 2026 -** Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, oo ay wehliyaan saraakiil ka tirsan waaxda, ayaa kulan wax-ku-ool ah la yeeshay wafdi sare oo ka socday hay'adda Oxfam Soomaaliya. Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga u dhexeeya Wasaaradda iyo hay'adda, iyo hubinta in habraacyada kormeerka iyo qiimeynta ee Oxfam ay si buuxda ula jaanqaadaan nidaamka qaran ee Wasaaraddu u dejisay hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP).

Labada dhinac ayaa isla gartay muhiimadda ay leedahay iskaashi dhow oo waxtar leh, si wadajir ahna loogu dardargeliyo dadaallada horumarineed, iyagoo carrabka ku adkeeyay sii xoojinta wada-shaqeyn istiraatiiji ah oo waarta.

## Isku-waafajinta Barnaamijyada WFP iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka




**21-ka Abriil 2026 –** Wasiirka Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud C. (Beenebeene), ayaa xafiiskiisa kulan miro-dhal ah kula qaatay Agaasimaha Hay'adda Cuntada Adduunka (WFP) ee Soomaaliya, Mudane Hameed Nuru. Kulankan ayaa qayb ka ahaa dadaallada lagu xoojinayo iskaashiga istaraatiijiyadeed ee u dhexeeya Dawladda Federaalka iyo Hay'adaha caalamiga, iyadoo xoogga la saaray sidii loo midayn lahaa mashaariicda horumarineed iyo hiigsiga fog ee dalka.

Intii uu kulanku socday, labada mas'uul waxay si qoto dheer uga wadahadleen sidii la isku-waafajin lahaa hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP) iyo qorshaha shaqo ee WFP (CSP) ka hor inta aan si rasmi ah loo ansixin. Arrintan ayaa gogol-xaar u ah in mashaariicda ay hay'addu dalka ka fuliso ay si toos ah ugu adeegaan baahiyaha mudnaanta u leh qaranka, iyadoo dhanka kale la isla qaatay muhiimadda ay leedahay xoojinta tayada hay'adaha dawladda si ay door hoggaamineed uga qaataan fulinta qorshaha UNCF 2026-2030.

Wasiirka iyo Agaasimaha ayaa sidoo kale isku raacay in kor loo qaado iskaashiga dhinaca sugnaanta cuntada iyo nafaqada, iyadoo la adeegsanayo Qorshaha U-diyaar-garowga Xasaradaha iyo Sugnaanta Cuntada (FSCPP) si looga gaashaanto caqabadaha soo noqnoqda.

Labada dhinac waxay hoosta ka xariiqeen in si loo damaanad qaado hufnaanta shaqada, ay lagama maarmaan tahay in la xoojiyo nidaamka iskuduwidda, kormeerka, iyo qiimaynta mashaariicda lagu fulinayo magaca Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Ugu dambayn, Wasiir Beenebeene ayaa ku bogaadiyey Hay'adda WFP taageerada hagar-la'aanta ah ee ay la garab-taagan tahay shacabka Soomaaliyeed, wuxuuna xaqiijiyey in xukuumaddu ay ka go'an tahay fududaynta iyo dardargelinta mashaariicda horseedaya horumar waara iyo isku-filnaansho dhaqaale.

## Hirgelinta Siyaasadda Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimeynta



**21-ka Abriil 2026 -** Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorshaynta (MoPIED), Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa kulan miro-dhal ah la yeeshay Agaasimaha Guud ee ADRA Somalia, Mudane Jorge Silva.

Qodobbadii ugu muhiimsanaa ee laga wada hadlay: Xoojinta hirgelinta Siyaasadda Qaranka ee Kormeerka iyo Qiimaynta (K&Q). Horumarinta hannaanka falanqaynta natiijooyinka mashaariicda si loo xaqiijiyo hufnaan iyo isla-xisaabtan. Hubinta in mashaariicda horumarineed ay keenaan natiijooyin waara oo waafaqsan qorshaha Qaranka.

Madaxda ADRA ayaa ballanqaaday inay si buuxda ugu hoggaansami doonaan siyaasadaha dowladda, iyadoo la xoojinayo iskaashiga dhow ee ay hay'addu la leedahay Dowladda Federaalka Soomaaliya.

## Kormeerka Waxqabadka Dowladda iyo Dardargelinta Natiijooyinka Qaranka



**18-ka Abriil 2026 -** Saraakiil iyo howlwadeeno ka tirsan Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha—gaar ahaan Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta—ayaa kormeer shaqo ku tagay Wasaaradaha Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta; Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka; iyo Awqaafta iyo Arrimaha Islaamka.

Kormeerka Wasaaradda Arrimaha Gudaha waxaa si wadajir ah u hoggaaminayay Ku-xigeenka Xoghayaha Joogtada ah ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Mudane Cabdirisaaq Ibraahim, iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Cabdifataax Cabdiqaadir Faarax. Halka kormeerada Wasaaradaha Cadaaladda iyo Awqaafta ay hoggaaminayeen Ku-xigeenka Xoghayaha Joogtada ah iyo Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur.

Intii ay socdeen kulamada, waxaa diiradda lagu saaray qiimeynta waxqabadka rubuca koowaad (Janaayo–Maarso), dib-u-habaynta qorshayaasha rubuca labaad (Abriil–Juun), iyo dejinta mudnaanta istiraatiijiga ah ee hawlaha soo socda.

Kormeerkan wuxuu laf-dhabar u yahay dadaallada lagu dardargelinayo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), iyadoo la xoojinayo hay'ado dowladeed oo hufan, isla-xisaabtan leh, isla markaana ku shaqeeya hannaan ku saleysan natiijooyin la cabbiri karo.

## Daah-furka Mashariicda Qaran ee Maalgashiga iyo Soo Jiidashada Maalgashi



**18-ka Abriil, 2026 -** Waaxda Maalgashiga ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa Muqdisho ku qabatay kulan labo-maalin ah oo lagu daah-furayay isla markaana lagu soo bandhigayay Mashariicda Qaran ee Maalgashiga, iyada oo ay ka soo qeyb-galeen wakiillada hay'adaha dowladda federaalka ah, dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ah, Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed, Ganacsatada, Jaamacadaha iyo maalgashatada caalamiga ah.

Waa markii ugu horeysay oo ay Soomaaliya soo bandhigeyso mashariicda qaran ee maalgashiga, kuwaas oo waafaqsan heerarka bandhigga mashariicda maalgashiga caalamiga ah taas oo maalgashatada fahan guud ka siin doonta maclumaadka la xiriira mashariicdan si ay go'aamo maalgashi oo ku qotoma maclumaad sugan u qaataaan.

Ujeeddooyinka kulankan waxa ka mid ah: soo bandhigidda mashariicda qaran ee maalgashiga ee waafaqsan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (2025-2029); soo jiidashada maalgashiga caalamiga ah iyo abaabulka maalgashiga maxalliga ah; sare u qaadidda kalsoonida maalgashatada iyo ugu dambeyn isu soo dhoweynta hay'adaha iyo shakhsiyaadka horumariya mashariicda iyo maalgashatada.

"Daah-furka iyo soo bandhigista mashariicdan qaran ee maalgashiga waxa ay muujineysa in isbeddel xooggan ku yimid horumarka dhaqaalaha dalka, oo uu ka guurayo ku tiirsanaantii deeqaha una guurayo hannaan horumar dhaqaale uu hoggaaminayo maalgashiga. Marka aan is-waafajinno mashariicdan qaran ee maalgashiga, Qorshaha Isbeddelka Qaranka iyo heerarka suurtogalnimada maaliyadeed ee mashariicdan, waxa aan maalgashatada dunida iyo kuwa guadaha dalkaba u muujineyna in aan la nimid geedi-socodka nidaam horumarineed oo cad isla markaana la'isku halleyn karo. Mashariicdani ma'ahan kaliya fursado maalgashi oo faa'iido laga helayo, balse waxay qeyb muhiim ah ka yihiin casriyeynta dhaqaalaha Soomaaliya." ayuu yiri Cabdifatax Cabdiqadir Faarax, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalah Xukuumadda Federaalka Soomaaliya.

"Hindisahan soo bandhigista mashariicda qaran ee maalgashiga (2026-2030) waxaa loo diyaariyay si maalgashatada caalamiga iyo kuwa maxalliga ah u helaan fursadaha maalgashi ee saameynta togan ku leh qeybaha dhaqaalah ee wax soo saarka iyo kuwa kaabe-yaasha ah- sida tamarta, kaabeyaasha dhaqaalaha iyo kheyraadka badda. Waxan dhexda u xiranay sidii aan u yareyn laheyn khataraha mashariicdan, lana hubiyo in ay yihiin kuwo daah-furan, sharciyad adag ku dhisan isla markaan si deg-deg ah loo maalgelin karo. Fariinta aan dunida u direyno waa ay cadddahay: Kaalaya oo sahmiya fursadaha maalgashi ee dalka Soomaaliya." Ayuu yiri Maxamed Dhubow, Agaasimaha SOMINVEST.
SOMINVEST waxa loo igmaday dhiirigelinta, soo jiidashada, fududeynta iyo taageerista maalgashiga caalamiga iyo midka maxalliga ah. Waxa ay sidoo kale u igmantahay hagaajinta iyo y qareemidda muuqaalka iyo sumcadda dalka si loo xoojiyo jawiga maalgashiga dalka.

## Xoojinta Wadashaqeynta Hoggaanka Wasaaradda iyo Daadajinta Shaqada



**18-ka Abriil 2026 -** Hoggaanka sare ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa kulan soo dhaweyn iyo isbarasho ah u sameeyay Wasiir Ku-xigeenka cusub ee Wasaaradda, Mudane Ismaaciil Ciid Maxamed, kaas oo uu dhowaan xilkan u magacaabay Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xamsa Cabdi Barre.

Intii uu socday kulanka, waxaa hadallo dhiirrigelin iyo soo dhaweyn ah ka jeediyay: Mudane Maxamuud Cabdiraxmaan Sheekh Faarax (Beenebeene): Wasiirka Wasaaradda iyo Mudane Cabdifataax Cabdiqaadir Faarax: Agaasimaha Guud ee Wasaaradda.

Wasiir Ismaaciil Ciid Maxamed ayaa ka mahadceliyay kulankan, wuxuuna si rasmi ah ula wareegay xilka Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda, kaas oo uu horey isaga casilay Mudane Maxamed Aadan Maxamed.

## Xoojinta Awoodda Dowladda ee Siyaasadaha Shaqo-abuurka Dhalinyarada



**17-ka Abriil 2026 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HDH) ayaa si guul leh u soo gabagabaysay tababar socday lix maalmood oo ku saabsanaa diyaarinta iyo hirgelinta siyaasadaha, kaas oo lagu xoojinayo awoodda saraakiisha Dowladda Federaalka Soomaaliya ee la xiriirta shaqo-abuurka dhalinyarada iyo horumarinta ganacsiga (YEPS II).

Tababarka, oo ka dhacay Nairobi intii u dhaxaysay 10 ilaa 16 Abriil, ayaa waxaa ka qeybgalay 21 sarkaal oo ka kala socday hay'adaha muhiimka ah ee dowladda. Tababarku waxa uu isugu jiray casharro, layliyo wax-ku-ool ah, aqoon is-weydaarsi, iyo booqashooyin waxbarasho oo lagu tagay hay'ado ku yaalla Kenya, si ka qaybgalayaashu u helaan khibrad dhab ah oo ku saabsan hirgelinta siyaasadaha.

Tababarka waxaa soo qabanqaabisay Wasaaradda Qorsheynta Qaranka, waxaana fududeeyay Kenya School of Government oo ah (machad bixiya tababaro lagu xoojinayo aqoonta shaqaalaha dowladda iyo adeegyada), iyadoo ay taageeraysay hay'adda Dwoaldda Jabaan u qaabilsan Iskaashiga Calamiga (Japan International Cooperation Agency), iyada oo loo marayo barnaamijka YEPS II.

Ka qaybgalayaashu waxay ka kala socdeen Wasaaradda Qorsheynta, Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha, Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Wasaaradda Tamarta iyo Biyaha, Wasaaradda Beeraha iyo Waraabka, Wasaaradda Kalluumeysiga iyo Dhaqaalaha Buluugga ah, Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, iyo Madaxtooyada Soomaaliya (Villa Somalia).

Intii uu socday tababarka, ka qaybgalayaashu waxay kororsadeen xirfadaha la xiriira falanqaynta siyaasadaha, dejintooda, qorsheynta hirgelinta, abaabulka kheyraadka, iyo kormeerka iyo qiimeynta (M&E), iyagoo diiradda saarayay xal u helidda caqabadaha shaqo la'aanta dhalinyarada.

Tababarka ayaa lagu soo gabagabeeyay bandhigyo kooxeed iyo guddoonsiinta shahaadooyin.
Hindisahan ayaa qeyb ka ah dadaalada Xukuumadda Dan-Qaran ee lagu dhisayo hay'ado dowladeed oo awood leh, isku xiran, isla markaana ku shaqeeya natiijooyin muuqda, oo waafaqsan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

## Wareejinta Xilka Agaasimaha Guud iyo Xoojinta Hoggaanka Wasaaradda



**15-ka Abriil 2026 -** Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa si rasmi ah xilka Agaasimaha Guud ugu kala wareejiyay Mudane Cabdifataax Cabdiqaadir Faarax iyo Agaasimihii hore, Mudane Maxamed Shire, munaasabad ka dhacday xarunta Wasaaradda ee magaalada Muqdisho.

Munaasabadda waxaa ka qeyb galay Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda, Mudane Ismaacill Ciid Maxamed, wasiirro heer federaal iyo dowlad-goboleed, xildhibaanno, agaasimayaal guud oo heer federaal iyo dowlad-goboleed, wakiillo ka socday bulshada rayidka, iyo shaqaalaha Wasaaradda.

## Hagaajinta Nidaamyada Kormeerka iyo Qiimeynta Mashaariicda



**14-ka Abriil 2026 -** Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa kulan la yeeshay Agaasimaha Guud ee Hay'adda Concern Worldwide ee Soomaaliya, Mudane Richard Nunn.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga dhinacyada kormeerka iyo qiimaynta, hirgelinta iyo u hoggaansanaanta Siyaasadda Qaran ee Kormeerka iyo Qiimaynta, iyo sidoo kale kor u qaadidda habraacyada dib-u-eegista iyo la socodka mashaariicda ay hay'addu ka fuliso dalka.

Labada dhinac ayaa sidoo kale booqasho sharafeed ugu tagay Agaasimihii Guud ee Wasaaradda, Mudane Maxamed Shire, iyagoo la wadaagay natiijooyinka kulanka iyo talooyin wax-ku-ool ah oo lagu xoojinayo wada shaqeynta mustaqbalka dhow.

Agaasimaha Guud, Mudane Maxamed Shire, ayaa si diirran u soo dhaweeyay iskaashiga u dhexeeya Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta iyo Hay'adda Concern Worldwide, isagoo bogaadiyay dadaallada lagu xoojinayo kormeer iyo qiimayn tayo leh oo lagu hubinayo wax-ku-oolnimada mashaariicda horumarineed.

## Xoojinta Nabadda iyo Xasilloonida Iyadoo Loo Marayo Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya



**14-ka Abriil 2026 -** Agaasimihii Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamed Shire, ayaa ka qayb galay shirka Guddiga Sare ee Sanduuqa Xasilinta Soomaaliya (SSF III), oo si wadajir ah u shir-guddoominayeen, Mudane Cali Yuusuf (Cali Xoosh), Wasiirka Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-uheshiisiinta, iyo Mudane Charles King, Safiirka Boqortooyada Ingiriiska ee Soomaaliya.

Shirka ayaa lagu soo bandhigay wixii u qabsoomay barnaamijka sannadkii hore (Sannadka 3aad), waxaana sidoo kale lagu falanqeeyay qorshaha iyo sida loo wajahayo sannadka cusub (Sannadka 4aad). Ka qaybgalayaashu waxay yeesheen dood ku saabsan xoojinta nabadda, yaraynta khilaafaadka, iyo wax ka qabashada caqabadaha sida abaaraha iyo cunno yaraanta.

Ugu dambayn, shirka ayaa lagu go'aamiyay jihada iyo mudnaanta la siinayo howlaha sannadka 4aad, iyadoo la adkeeyay muhiimadda wada shaqeynta dowladda iyo saaxiibada caalamka si loo gaaro xasillooni iyo horumar waara.

## Mideynta Qorsheynta Qaranka iyo Dardargelinta Hirgelinta NTP




**14-ka Abriil 2026 -** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay kulan wadatashi ah oo ay isugu yimaadeen xubnaha Golaha Horumarinta Qaranka, oo ay ku mideysan yihiin Wasiirka Qorsheynta ee Dowladda Federaalka iyo Wasiirrada Qorsheynta ee Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo Maamulka Gobolka Banaadir.

Shirkan oo ahaa mid heer sare ah ayna soo agaasintay Waaxda Qorsheynta Qaran ee Wasaaradda ayaa diiradda lagu saaray mideynta aragtida guud ee qorsheynta qaranka, dejinta mudnaanta horumarineed, iyo dardargelinta hirgelinta qorshayaasha istiraatiijiga ah ee dalka. Waxaa sidoo kale xoogga la saaray xoojinta wada-shaqeynta u dhexeysa heerarka kala duwan ee dowladda, iyo isku-duwidda jawaabaha ku aaddan xaaladaha degdegga ah ee dalka ka jira.

Kulanka waxaa si rasmi ah u furay Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Xildhibaan Maxamuud Cabdiraxman Sheekh Faarax (Beenebeene), oo adkeeyay muhiimadda dhismaha nidaam mideysan oo hagaya qorsheynta qaranka, iyo dardargelinta fulinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (QIQ 2025–2029).

Intii uu socday kulanka, waxaa khudbado muhiim ah ka jeediyay Wasiirrada Qorsheynta ee Dowlad Goboleedyada, oo kala ahaa Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Galmudug Mudane Cabdiraxman Axmed Xayle, Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Koonfur Galbeed Mudane Cabdixakiim Maxamed Fiqi, Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Hirshabelle Eng. Maxamuud Cabdi Cali, Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Waqooyi Bari Mudane Cali Warsame Cismaan, waxa ayna soo bandhigeen xaaladaha horumarineed ee deegaanadooda, fursadaha jira, caqabadaha taagan, iyo mudnaanta sanadka soo socda.
Shirka waxaa lagu soo bandhigay warbixin ku saabsan siyaasada iyo istaraatejiyada hirgelinta Qorshaha Isbedela Qaranka, maalgaelinta, Kormeerka iyo Qiimeynta iyo horumarka laga sameeyay hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka, kuwaas oo ay diyaariyeen waaxyaha kala duwan ee Wasaaradda.

Qodobada Muhiimka ah ee ka soo baxay Shirka:

1. In la dardargeliyo hirgelinta Qorshaha Qaranka iyadoo la xoojinayo iskuduwidda iyo islaxisaabtanka.
2. In la mideeyo qorsheynta, xog-wadaagga, iyo warbixinta u dhexeysa Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleedyada, iyo Maamulka Gobolka Banaadir.
3. In mudnaan gaar ah la siiyo arrimaha cuntada, nafaqada, iyo xaaladaha bani'aadannimo.
4. In la xoojiyo isku-duwidda bah-wadaagta caalamiga ah, gaar ahaan isku-waafajinta Qorshaha Qaranka iyo UNSDCF.
5. In la kordhiyo dadaallada abaabulka kheyraadka gudaha iyo dibadda si loo xaqiijiyo xalal waara.

Gabagabadii Wasiirka Qorsheynta ayaa soo xiray shirka, waxa uuna adkeeyay in Wasaaraddu sii laba jibbaari doonto dadaallada lagu xoojinayo wada-shaqeynta u dhexeysa Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, si loo xaqiijiyo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka, loona gaaro horumar waara oo si siman uga faa'iideysta dhammaan bulshada Soomaaliyeed.

## Hirgelinta Hannaanka Tiirarka NTP iyo Xoojinta Isla-xisaabtanka Wadajirka ah



**13-ka Abriil, 2026 -** Waaxda Isku-duwidda Deeqaha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa Muqdisho ka daahfurtay kulamo istiraatiiji ah oo hordhac u ah Hanaanka Wadashaqeynta Tiirarka (PWGs) ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Kulamadan oo socon doona 13–16 Abriil 2026, ayaa lagu qiimeynayaa horumarkii 2025 iyo heerka fulinta bartilmaameedyada NTP, iyadoo sidoo kale lagu dejinayo Qaab-dhismeedka Isla-xisaabtanka Wadajirka ah (MAF).

Maalintii koowaad ayaa diiradda lagu saaray Tiirka Dowlad Wanaagga, iyadoo ay ka qaybgaleen hoggaanka hay'adaha dowladda (MDAs), laguna ansixiyay ajandaha kulamada guud ee PWGs.

Kulamadan waxay xoojinayaan isku-duwidda, isla-xisaabtanka, iyo hirgelinta natiijo-ku-saleysan ee qorshaha qaranka.

## Kor u Qaadista Isla-xisaabtanka iyo Waxqabadka Hay'adaha Dowladda



**13-ka Abriil, 2026 -** Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, gaar ahaan Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, ayaa maalintii labaad kormeer shaqo ku tagay Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, Wasaaradda Hawlaha Guud, Dib-udhiska iyo Guryeynta iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka Dowladda Federaalka Soomaaliya.

Kormeerkan oo uu hoggaaminayey Ku-xigeenka Xoghaye Guud ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Mudane Cabdirisaaq Ibraahim, ayaa diiradda lagu saaray qiimeynta waxqabadka hay'adaha iyo dardargelinta hannaanka isla-xisaabtanka.

Intii uu socday kormeerka, masuuliyiinta ayaa kulamo la yeeshay Agaasimayaasha Guud iyo khubarada farsamo, iyagoo si gaar ah u falanqeeyay waxqabadka rubaca koowaad, dib-u-eegista qorshayaasha rubaca labaad, iyo jihaynta hawlaha mudnaanta leh.

Mas'uuliyiintu waxay xoojiyeen muhiimadda horumarinta awoodda shaqaalaha iyo hirgelinta adeegyo dowladeed oo tayo leh oo la jaanqaadaya baahiyaha bulshada.

Kormeerkan ayaa qayb ka ah dadaallada lagu dardargelinayo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), iyadoo la xoojinayo hufnaanta hay'adaha dowladda iyo xaqiijinta waxqabad ku saleysan natiijooyin la taaban karo.

## Adkaynta Iskaashiga Kormeerka iyo Qiimeynta ee Bah-wadaagta



**13-ka Abriil 2026 -** Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha (WQM&HD), Mudane Maxamuud Saciid, ayaa kulan muhiim ah kula qaatay magaalada Muqdisho mas'uuliyiin ka socday Hay'adda Qaxootiga Norway ee NRC.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray qodobbada soo socda: Adkaynta xiriirka wadashaqayn ee ka dhexeeya Wasaaradda iyo NRC; Horumarinta hannaanka Kormeerka iyo Qiimaynta si loo hubiyo hufnaanta mashaariicda; Is-dhaafsiga xogaha la xiriira mashaariicda horumarineed; iyo In mashaariicda NRC ay si buuxda ula jaanqaadaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Dhanka NRC, waxaa kulanka hoggaaminayay Kusimaha Agaasimaha ahna Madaxa Mashaariicda, Mudane Maxamed Adduun, iyo Madaxa Kormeerka iyo Qiimaynta, Mudane Maxamed Xasan. Mas'uuliyiinta NRC ayaa caddeeyay inay ka go'an tahay u hoggaansanaanta siyaasadaha dowladda iyo ilaalinta mabaadi'da wadashaqaynta

## Xukuumadda oo dardargelinaysa kormeerka, qiimeynta iyo isla-xisaabtanka hay'adaha dowladda



**12-ka Abriil, 2026 -** Iyadoo laga duulayo hiigsiga fog ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha iyo Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa bilaabay kormeer ballaaran oo lagu xoojinayo "Muraayadda Waxqabadka" ee hay'adaha fulinta dowladda.

Kormeerkan, oo uu hoggaaminayo Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, Mudane Cabdirisaaq Ibraahim, ayaa lagu tegay Wasaaradaha Arrimaha Dibadda, Beeraha iyo Waxbarashada.

Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta (M&E) ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, oo ka hadlay ujeedka kormeerkan farsamo, ayaa caddeeyey in nidaamka kormeerka dowladda lagu sameeyey dib-u-habeyn ku dhisan xog sugan iyo natiijooyin la cabbiri karo.

"Hadafkeenu ma aha oo kaliya inaan booqanno xafiisyada, balse waa inaan xaqiijinno in qorshe kasta oo ay wasaaraduhu dejiyeen uu u fulay sidii loogu talagalay. Waxaan cabbiraynaa faraqa u dhexeeya wixii la qorsheeyey iyo wixii dhab ahaan u qabsoomay, si muwaadinka Soomaaliyeed uu u helo adeeg hufan oo tayo leh," ayuu yiri Agaasime Maxamuud Siciid Nuur.

Kooxda farsamada ee Wasaaradda Qorsheynta ayaa si qoto dheer u baaray diiwaannada waxqabadka ee rubuca koowaad, iyadoo diiradda la saaray in mashaariicda socda ay si toos ah ula jaanqaadayaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka, in la helo xog dhab ah oo muujinaysa heerka ay adeegyada dowladda sida waxbarashada iyo beeraha u gaareen bulshada, iyo in la aqoonsado meelaha ay caqabaduhu ka jiraan si loo taageero wasaaradaha una fududaato in ay ka gudbaan.

Wasaaradda Qorsheynta waxay xoojinaysaa in kormeerkani yahay bilowga olole joogto ah oo lagu xaqiijinayo hufnaanta, isla-xisaabtanka, iyo waxqabad ku saleysan natiijooyin. Sida uu xusay Agaasime Maxamuud Siciid, xogta ka soo baxda kormeeradan waxay saldhig u noqon doontaa warbixinnada waxqabadka ee loo gudbiyo Golaha Wasiirrada iyo hoggaanka sare ee dalka.

Kormeerkan ayaa sii socon doona maalmaha soo socda, iyadoo la gaari doono dhammaan hay'adaha kale ee dowladda Federaalka.

## Horumarinta Heshiisyada Maalgashiga Labo-geesoodka Casriga ah




**11-ka Abriil 2026 -** Waaxda Maalgashiga (SOMINVEST) ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa Muqdisho ku qabatay kulan-howleed soconaya labo-maalmood oo lagu diyaarinayo Hannaanka Heshiisyada Maalgashi ee Labo-geesoodka ah (Bilateral Investment Treaty- BIT), kaas oo isku keenay wakiillada hay'adaha dowladda federaalka ah, dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka ah, Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed, Ganacsatada, Jaamacadaha iyo maalgashatada caalamiga ah.

Ujeeddooyinka kulan-howleedkan ayaa ahaa in dib-u-eegis lagu sameeyo isla markaana la ansixiyo qormo qoraalka hannaankan cusub ee heshiisyada maalgashiga labo-geesoodka ah, lana waafajiyo sharciga dhowrista maalgashiga iyo maalgashatada (2023); sharciga maalgashiga Soomaaliya (2025) iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (2025-2029) si loo xoojiyo dedaallada sare loogu qaadayo kalsoonida maalgashatada iyo xaqiijinta xuquuqdooda dastuurig ah iyo midda maamul.

Waa markii ugu horreysay oo ay Soomaaliya yeelaneyso Hannaanka Heshiisyada Maalgashi ee Labo-geesoodka casrig (2nd generation) ah kaas oo saldhig u noqon doona xiriirka maalgashi ee ay Soomaaliya la yeelan doonto dalalka kale. Hannaankan cusub ayaa isku dheelli tiraya baahida ay maalgashatada u qabaan dhowrista xuquuqdooda, dhiirigelinta maalgashiga iyo xuquuqda Soomalaiya aas-aasiga ah ee ku aaddan xeer-nidaaminta jawiga maalgashiga dalka.

"in ay Soomaaliya qaadato hannaanka heshiisyada maalgashiga labo-geesoodka casriga ah oo ay ka guurto kii taqliidiga ahaa waxa ay keenaysaa dabacsanaan ay ku bixiso adeegyo maalgashi oo ballaaran iyada oo xaqiijineyso xuquuqdeeda madax-bannaani ee xeer-nidaaminta jawiga maalgashiga dalkeeeda. Muddo dheer, Soomaaliya waxa loo soo diri jiray hannaan heshiis maalgashi labo-geesood ah oo inta badan u adeegayay danaha dalka soo diray. Haatan, Soomaaliya waxa ay heleysaa hannaan cusub oo mideyn doona heerarka tayo iyo kuwa sharci ee la xiriira shuruucda dhaqan-galka ka ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, qorshaha isbeedelka qaranka iyo guud ahaan danaha qaranka si loo ballaariyo maalgashiga caalamiga iyo midka maxalliga ah ee dalka" ayuu yiri Agaasimaha Waaxda Maalgashiga, Mudane Maxamed Dhubow.

SOMINVEST waxa loo igmaday dhiirigelinta, soo jiidashada, fududeynta iyo taageerista maalgashiga caalamiga iyo midka maxalliga ah. Waxa ay sidoo kale u idmantahay hagaajinta iyo u qareemidda muuqaalka iyo sumcadda dalka si loo xoojiyo jawiga maalgashiga dalka.

## Dib-u-eegista Barnaamijyada Arrimaha Bulshada iyo Horumarinta Adeegyada



**6-da Abriil 2026 -** Waaxda Kormeerka iyo Qiimeynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay shir wadatashi ah oo lagu falanqeeyay warbixinta kormeerka barnaamijyada arrimaha bulshada ee ay Hay'adda UNICEF ka fuliso dalka.


Shirka ayaa si qoto dheer diiradda u saaray natiijooyinka warbixinta, iyadoo la isla falanqeeyay guulaha la gaaray, caqabadaha jira, iyo meelaha u baahan in la xoojiyo. Sidoo kale, waxaa la soo bandhigay talooyin wax-ku-ool ah oo lagu horumarinayo tayada iyo gaarsiinta adeegyada bulshada.

Kulanka waxaa ka soo qaybgalay Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha, gaar ahaan Tiirka Arrimaha Bulshada, iyo wasaaradaha ay khusayso ee kala ah Caafimaadka, Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, Waxbarashada, Tamarta iyo Kheyraadka Biyaha, Shaqada iyo Arrimaha Bulshada, iyo Dhallinyarada iyo Ciyaaraha.

Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Maxamed Shire, oo si rasmi ah u furay shirka, ayaa bogaadiyay warbixinta kormeerka, isagoo carrabka ku adkeeyay doorka ay ku leedahay xoojinta isla xisaabtanka, kor u qaadista waxqabadka, iyo hagaajinta tayada adeegyada bulshada. Waxa uu xusay in talooyinka ka soo baxay warbixintu ay yihiin kuwo wax dhisaya oo gacan ka geysan doona horumarinta barnaamijyada iyo gaarsiinta natiijooyin la taaban karo.

Ugu dambayn, Waaxda Kormeerka iyo Qiimayntu waxay xaqiijisay inay sii wadi doonto kormeerka joogtada ah iyo la socodka barnaamijyada horumarineed ee dalka, iyadoo muddo saddex sano oo xiriir ah si nidaamsan u kormeertay barnaamijyada ay UNICEF ka fuliso Soomaaliya.

## Xoojinta Iskaashiga Gobolka iyo Horumarinta Jawiga Maalgashiga




**2-da Abriil 2026 -** Mudane Ismaaciil Cabdalla Cali, Madaxa Qaybta Fududeynta iyo Taageerada Maalgashiga ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, ayaa ka qayb galay kulan lagu ansixinayay Heshiiska Maalgashiga Urur Goboleedka (COMESA), kaas oo ay soo qabanqaabisay Hay'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan Ganacsiga iyo Horumarinta.

Heshiiskan cusub wuxuu ujeedkiisu yahay: in la fududeeyo, la kordhiyo kalsoonida maalgashatada, iyo in la abuuro jawi ganacsi oo hufan oo soo jiita maalgashi waara.

Sidoo kale, heshiiskan wuxuu ka caawinayaa dalalka COMESA in ay yeeshaan siyaasado isku dhow oo taageera kobaca dhaqaalaha, abuurista shaqooyin, iyo horumar waara oo bulshada faa'iido u leh.

Ka-qaybgalka Soomaaliya wuxuu muujinayaa dadaalka dowladda ee ku aaddan soo jiidashada maalgashi tayo leh iyo xoojinta iskaashiga dalalka gobolka.

## Isku-duwidda Mashaariicda Arrimaha Bulshada iyo Xoojinta Nidaamyada K&Q



**1-da Abriil 2026 -** Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa qabatay kulan shaqo oo heer sare ah, kaas oo ay la yeelatay saraakiisha sare ee qaybaha kala duwan ee Tiirka Arrimaha Bulshada ee Xafiiska Ra'iisul Wasaaraha.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray xoojinta iskaashiga hay'adaha, horumarinta wadaagista xogta, is-waafajinta mashaariicda arrimaha bulshada, iyo kor u qaadista nidaamyada Kormeerka iyo Qiimaynta (K&Q), si loo hubiyo in mashaariicdu ay si buuxda ula jaanqaadaan Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Waaxdu waxay soo bandhigtay xog dhammaystiran oo ku saabsan mashaariicda dalka ka socda, iyadoo si cad loo muujiyay doorka Dowladda ee heerarka kala duwan ee fulinta. Waxaa sidoo kale si qotodheer looga dooday sidii mashaariicdaasi u noqon lahaayeen kuwo wax ku ool ah, hufan, isla markaana leh nidaam isla-xisaabtan oo cad.

Kulanka waxaa shir-guddoomiyay Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur.